



Federal Republic of Somalia
House of the People
Office of the 1st Deputy Speaker

Ref: | 82/5/1stDS/B-10/18 | الرقم:

Mogadishu November 28, 2018: التاريخ

Ku: Golaha Shacabka
Og: Guddoomiyaha Golaha Shacabka
Og: Guddoomiye Ku-Xigeenka 2aad ee Golaha Shacabka
Og: Xafiiska Habdhowrka
Og: Xoghayaha Guud

Ujeedo: KALA DIRID GUDDIGA MIISAANIYADDA, MAALIYADDA, QORSHEYNTA IYO LA-XISAABTANKA

- KA DIB MARKAAN** arkay qoraalka Guddoomiye Ku-Xigeenka 2aad ee Golaha Shacabka ee summadeedu tahay 0173/B-10/GSH/11/18 cinwaankeedu yahay *Baarista Khilaafka Guddiga Maaliyadda* ee ku taariikhseysan 27/11/2018;
- KA DIB MARKAAN** arkay qoraalka Xafiiska Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka ee summadeedu tahay 220/XXG/B-10/18 ee cinwaankeedu yahay habraaca Warbixinta Maaliyadeedka Guddiga Maaliyadda, iyo sida oo kale qoraalka Karaaniga Guddiga Maaliyadda ee Golaha Shacabka ee ku taariikheysan 25/11/2018;
- KA DIB MARKAY** ii cadaatay xadgudubyada xeerhoosaadka ee lagu soo caddeeyey qoraalada xafiisyada sare ku xusan ee saameyneysa qodobada Qodobka 58aad faqrada 5aad; Qodobka 60aad faqrada 10, 11, 16aad; Qodobka 62aad cinwaanka (Warbixinta Guddiga ee la baaray) faqrada 2aad iyo faqrada 3aad; iyo Qodobka 12aad faqrada (g);
- KA DIB MARKAY** cadaatay khilaafka ka dhex jira Guddoonka Guddiga Maaliyadda oo gaaray heer aad u fool xun;
- KA DIB MARKAY** xubnaha Guddiga isku hor khilaafeen Golaha hortisa isla markaasna aysan muuqan wadashaqeyn ay ku gutaan waajibaadka horyaala;
- KA DIB MARKAAN** la tashaday Guddoomiyaha Golaha Shacabka iyo Guddoomiye Ku-Xigeenka 2aad ee Golaha Shacabka;

Waxaan guddoonsanay qodobadan hoose:

1. Waxaa la kala diray xubnaha Guddiga Miisaaniyadda, Maaliyadda, Qorsheynta iyo La-Xisaabtanka Hay'adaha Dowladda;
2. Waxaa degdeg loo soo magacaabayaa Guddi Maaliyadeed cusub;
3. Waxaa degdeg loo qaban doonaa doorashada Guddoon cusub;

Naga Guddooma Salaan Diirran iyo Qadarin

M.ne Cabdiweli Ibraahim Sh. Mudeey
Guddoomiye K/X/1aad ee Golaha Shacabka,
Ahna K/simaha Guddoomiyaha Golaha Shacabka

3/6
c

